

Diyaarinta Nadiifinta Caloosha:

Nadiifinta Caloosha ee Labada Maalmood Baaritaanka Kadib 1 ka Duhurnimo Miralax and Magnesium Citrate

Isu Diyaarinta Baaritaanka

Maalin ka hor maalinta baaritaanka waxaa lagaa doonayaa inaad isu diyaariso baaritaanka. Waa in jirkaagu nadiif ahaadaa sidoo kale si dhakhtarku u arki karo xilliga baaritaanka. Waxa aad isticmaaleysaa **Miralex and Magnesium Citrate** ee nadiifinta mindhicirada.

Haddii aad horey kelyaha uga jiratay ama qabto cudurada kelyaha, ha **qaadan** Miralax and Magnesium Citrate ee nadiifinta caloosha oo la xiriir dhakhtarka kuu qoray tubada Laalaabanta Ee Lagu Eego Dhinaca Bidix Ee Mindhicirada

Fadlan raac dhamaan tilmaamaha. Haddii **aaadan** si haboon u raacin tilmaamaha waxaa suurogal ah in la **baajiyo** eegidda mindhiciradda. Si aad ugu diyaargarowdo eegidda mindhicirada, waxaa lagaa doonayaa inaad iibsato waxyaabaha caloosha lagu nadiifiyo.

Daawada aad iibsaneyso:

- Sideed kiniin oo Bisacodyl/Dulcolax ah (5mg).
Waa in aad kiniink afka ka qaadataa.
- Hal dhalo oo 238-gram dhalo oo Miralax ah.
- Dhalo 10 wiqiyadood ah oo Magnesium Citrate ah.
(Uma baahnid in dhakhtar kuu qoro)

Waxa aad ka heleysaa dukaanka aad ka adeegato:

- Gatorade (64 ounces) nooc kasta aan ka aheyn **casaan ama hurdi**.
- Waad iibsan kartaa **laba** xabo oo midiiba tahay 32 wiqiyadood.

Waxaa ku soo wacaya kalkaaliye caafimaad oo qaabilsan diiwaangelinta 5 ilaa 7 cisho ka hor baaritaanka. Waxa ay ku weydiinayaan su'aalo kaa caawinaya u diyaargarowga baaritaanka, waxa ay kaala hadlayaan caafimaadkaaga; waxayna kaa caawinayaan daawada aad qaadatao ka hor iyo ka dib baaritaanka. Haddii aad qabto **wax** su'aal ah oo ku saabsan tilmaamaha, fadlan soo wac **(320) 229-4974** Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxeysa 8da aroornimo ilaa 4ta galabnimo. Waxa kale oo aad soo wici kartaa 1-844-795-1734. Haddii aad rabto inaad bedesho balanta, fadlan soo wac **(320) 229-4933**.

Shan (5) maalin ka hor maainta la eegayo mindhicirka

- **Ha qaadan** qaadan daawooyinka shubanka joojiya – Sida: Imodium ama Pepto-Bismol.
- **Ha qaadan** daawoyinka saraxada jiliciya – Sida: Metamucil ama Citrucel.
- **Ha qaadan** fatiimanada birta dhiiga xoojiya – Sida: Multi-vitamins.
- **Ha qaadan** fatimiin E ama daawada:

Sadex (3) maalin ka hor maainta la eegayo mindhicirka

- **Wax yar oo cuntada caloosha jilicisa ku bilow - Ha qaadan** cuntada aad caloosha u jilciya tusaale ahaan: Daangada, miraha (gabaldayaha, lawska iyo salbukada), rootida sareenka ka sameysan, miraha la qariido, ansalaatada, qudaarta ceyriin, ama markaa la soo jaray ama qalalan. Xadid inta aad hilibka ka cunto.

Labba (2) maalin ka hor maainta la eegayo mindhicirka

- Biyo cad oo kaliya cab **maalinta oo dhan**
- Waa in aad cabtaa ugu yaraan sideed galas oo biyo ah saacad kasta ka dib marka aad soo kacdo.
- **9ka aroornimo.**, qaado afarta kiniini ee Bisacodyl/Dulcolax.
- **6da** Maqribnimo waa inaad cabtay **dhamaan** dhalada 10-wiqiyadood ee Magnesium Citrate.

Hal (1) maalin ka hor maainta la eegayo mindhicirka

- Biyo cad oo kaliya cab **maalinta oo dhan** maalinta ka horeysa eegista mindhicirka. **Ha cunin** cunto adag.
- Ku qas Miralaxa (dhalada oo dhan) ee 64 wiqiyadood ee Gatarode. Talaajada waad gashan kartaa laakiin muhim ma aha.
- **9ka aroornimo.**, qaado afarta kiniini ee Bisacodyl/Dulcolax.
- **6da maqribnimo** bilow inaad cabto Miralax iyo Gatorade la isku qasay. Waa inaad cabtaa **sideed wiqiyadood** koob ah 15kii daqiiqaba ilaa aad ka dhameys **kala bar** (32-wiqiyadood).
- Dadka qaar baa dareema yalaalugo, dibiro ama matag. Haddii ay taasi dhacdo, ka naso 15-30 daqiiqo ka dibna isku day inaad cabto waxyaabaha aad isku qastay.
- Geli talaajadda 32ka wiqiyadood si aad subaxa dambe u cabto.

Maalinta eegista Mindhicirka

- **8da aroornimo** ayaad bilaabeysaa inaad cabto **kala bar** (32 wiqiyadood) ee Miralax iyo Gatorade la isku qasay.
- Waa inaad cabtaa **sideed wiqiyadood** koob ah 15kii daqiiqaba ilaa aad ka dhameys dhamaan dhalada.
- Waxa aad cabi kartaa **biyo** kaliya ilaa **afar saacadood ka hor** balanta aad ku **tageyso**.
- Waa in aad cabitaanka dhameysaa **9ta aroornimo**.
- Waxa aad qaadan kartaa daawada **adiga oo biyo yar ku kabanaya**.

- Xusuusnoow **ha cunin cunto adag.**